

Xeer Wasaaradda Gaarsoorka iyo Caddaaladda - 4 Novembar 1962, lamba. 269.

Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda

Qodobo la xiriiro kala soocidda Garsoorayaasha iyo Kaaliyeyaasha Garsoorka.

Wasiirka

Markuu arkay qodobbada 83 iyo 85 ee Dastuurka;

Markuu arkay qod. 35 ee Sharciga 15 Maarso 1962, lamba. 7, eek u saabsan kala soocista shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda;

Markuu arkay qod 34 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee lagu ansixiyay Xeer-Sharci ee 12 Juun 1962. lamba. 3, kaas oo lagu qeexay in, marka loo eego garsoorayaasha iyo kaaliyeyaasha nidaamka garsoorka, hawlaha guddiga kala saarista waxaa fulinaayo golaha sare ee garsoorka;

Markuu arkay qod. 3 ee Degreetada Madaxweynaha ee 28 Luulyo 1962, lamba. 158, kaasoo lagu qeexay xeerar guud oo lagu kala soocaayo Garsoorayaasha iyo Kaaliyeyaasha Garsoorka, waxaa loo isticmaalaa in lagu habeeyo kala-soocidooda; ayadoo marka hor lagu baarayo, si waafaqsan sida uu qabo qodobo xeerar kale oo uu soo saarayo Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda gudaha 31 December 1962;

Marka la tixgeliyo baahida degdegga ah ee loo qabo in, la soo saaro xeer sharci oo lagu xaqiijinaayo meel marinta xeerarkan sharci ee lagu kala soocaayo garsoorayaasha;

Markuu dhageestay ra'yiga Golaha Sare ee Garsoorka;

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

- 1) Kala soocista ama meelaynta Garsoorayaasha joogtada ah marka uu dhaqan galay nidaamka garsoorka ee lagu ansixiyay xeer-sharci ee 12 June 1962, lamba. 3, waxaa lagu kala reebi doonaa, marka laga reebo sida lagu sheegay faqradda soo socoto, imtixaan oo laga qaadi doono.
- 2) Waxaa si sharci ah u qalmi doono in lagu daro, iyadoo laga dhaafayo imtixaanka:
 - a) garsoorayaasha la siiyay shahaado uu ka qaatay Machadka Jaamacadda Muqdisho iyo shahaado sare ama mid u dhiganta;
 - b) Garsoorayaasha tijaabada ku jiro sida ku cad qod. 3, faqradda afraad, ee Xeer Madaxweyne ee 28 Luulyo 1962, lamba. 159, oo iyagana arrintooda ku xiran tahay natiijada wanaagsan ee imtixaanka ugu dambeeyo ee tababarka.

Qod. 2

Uma qalmaan in lagu daro meeleyn, si waafaqsan qod. 3, faqradda labaad ee Degreetada Madaxweynaha 28 Luulyo 1962, lamba. 158, taasoo lagu saleynaayo go'aanka looga joojinaayo adeegga garsoorka, garsoorayaasha:

- a) dhammaystay 31 December 1962 da'da lixdanaad;
- b) kuwaas oo aan ka keenin natiijo wanaagsan oo guul leh imtixaanka kala soocista shaqaalaha, kana qayb qaadan imtixaankan iyaga oo aan haysan sabab macquul ah.

Qod. 3

- 1) Imtixaanka kala soocida wuxuu ka koobnaan doonaa:

- a) Garsoorayaashii hore uga tirsanaan jiray, waxaa laga qaadayaa imtixaan qoraal oo khasab ah ee shareecada, iyo imtixaan qoraal oo ikhtiyaari ah oo xagga sharciga iyo qaanuunka hababka ciqaabta;

Codsiga gelitaanka imtixaanka waa in uu ku yimaadaa hab kala sareyn ahaan Golaha Sare ee Garsoorka, ilaa 31 Decembar 1962, iyadoo la soo raacinaayo warbixin ka socoto Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee awoodda u leh. Codsigu waa inuu ku cad yahay darajada, heerka iwm.

- b) Garsoorayaasha kale, waxaa laga qaadi doonaa laba imtixaan oo qoraal ah oo khasab ah, mid sharciga madaniga ah ee dawladda iyo kan kale ee sharciga ciqaabta iyo habraaca iyo imtixaan qoraal ah oo ikhtiyaari ah oo shareecada ah.
- 2) Waxaa lagu dhawaaqi doonaa inay ku habboon yihiin laguna dari doonaa garsoorayaasha keenay ugu yaraan 30 kontonaad natiijada imtixaan kasta oo khasab ah.
- 3) Magacaabista Guddiyada Imtixaanaadka, iyo goobta, taariikhda iyo hab kasta oo kale oo imtixaanku u dhacayo waxa lagu soo saarayaa wareegto dambe oo uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Garsoorka.

Qod. 4

Codsiga gelitaanka imtixaanka waa in ay u soo diraan madaxda sare Golaha Garsoorka Sare 31 Decembar 1962, oo ay la socoto warbixinta macluumaadka Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee awoodda u leh. Codsigu waa inuu caddeeyaa shahaadada, darajada, kala sareynta adeegga, shaqooyinka la adeegsaday iyo da'da musharraxa, haddii uu doonayo inuu galo imtixaannada kulliyadda.

Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Garsoorka, ayaa marka uu helo talada Golaha Sare ee Garsoorka, waxa uu qabanqaabin doonaa gelitaanka Imtixaanka.

Qod. 5

Golaha Sare ee Garsoorka ayaa dejin doona soo jeedinta ku saabsan meelaynta Majisteraydyada shahaadooyinka kala duwan ee sharcigu u dejiyay, iyadoo la tixgalinayo shahaadadii hore loo soo maray iyo kala sareynta xirfaddii hore iyo culuumta hore, shahaadooyinka, iyo sidoo kale natiijada imtixaanka meeleynta; marka tani ay qasab tahay in la sii wado.

Qod. 6

Garsoorayaasha, sababo uu Wasiirka Nimcada iyo Caddaaladdu garwaaqsaday inaysan ka qaybgalikin imtixaankii ugu horreeyay ee meeleynta, ayaa la geli doonaa imtixaan kale si wax looga qabto tan dambe.

Muqdisho, Novembar 1962

Ahmed Gelle Hassan

Arkay ku diiwaangeliyay 9 - Reg. lamba. 2 lamba. 236

Muqdisho, 19 Novembar 1962.

Hantidhowraha Guud: **Ahmed Dahir**